



## Remdesivir

### S: Waa maxay Remdesivir?

Remdesivir waa daawo loo adeegsado in lagu daaweeyo cudurka COVID-19. Waxaa loo adeegsadaa in lagu daaweeyo caabuqa. Looma isticmaali karo si looga hortago.

### S: Waa tee cida loogu talagalay Remdesivir?

Remdesivir waxaa loogu talagalay dadka waaweyn iyo carruurta da'doodu tahay 12 sano iyo wixii ka weyn kuwaas oo isbitaalka la dhigay. Waxaa dhawaan loo ansixiyey inay isticmaalaan bukaanada aan isbitaalka la dhigin ee khatarta sare ugu jira xanuunka daran ee COVID-19 kuwaas oo laga helay COVID-19.

### S: Sidee ayaa la isugu qoraa?

Remdesivir waxaa laga qaataa xididada. Waa inuu kuu qoraa bixiyaha daryeelka caafimaadka.

### S: Hadda miyaa la heli karaa daawada Remdesivir?

Haa, bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka waxay heli karaan iyaga oo adeegsanaaya kanaalada caadiga ah. OHA wax door ah hadda kuma laha qaybinta daawadaan.

### **Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Remdesivir, ka akhri [Xaashida Macluumaadka Bukaanka ee FDA.](#)**

**Helitaanka dukumiintiga:** Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabacaada farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Qeybta Isgaarsiinta COVID-19  
1-971-673-2411, 711 TTY ama [COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us](mailto:COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us).